



Federal Foreign Office

Berghof Foundation



Buug-yaraha Wadahadalka Qaranka Hagaha Xirfadlayaashae **Nuxurka oo Kooban**

iyada oo lala kaashanaayo



Schweizerische Eidgenossenschaft
Confédération suisse
Confederazione Svizzera
Confederaziun svizra

Federal Department of Foreign Affairs FDFA
Directorate of Political Affairs DP
Human Security Division:
Peace, Human Rights, Humanitarian Policy, Migration

swisspeace

Schweizerische Friedensstiftung
Fondation suisse pour la paix
Fondazione svizzera per la pace
Swiss Peace Foundation

ABOUT THIS PUBLICATION

This publication is the Executive Summary of Berghof Foundation's National Dialogue Handbook. A Guide for Practitioners. The Executive Summary provides a comprehensive overview of the National Dialogue Handbook which grounded in a series of contemporary case studies, aims to contribute to the nascent debate about National Dialogue, bringing together insights and expertise from diverse regions. The purpose of the Handbook is twofold: (1) to offer an analytical framework of National Dialogues and (2) to serve as a practical tool for those engaged in the implementation of these processes. It also addresses the role of external actors and how they can best support National Dialogue processes, but it is focused primarily on those who are in the driver's seat when it comes to decisions on the design, conduct and implementation of National Dialogue processes.

ABOUT THE BERGHOF FOUNDATION

The Berghof Foundation is an independent, non-governmental organisation supporting people in conflict in their efforts to achieve sustainable peace through conflict transformation. For 50 years, we have worked to bring key people in conflict together to enable them to resolve their conflicts through dialogue and negotiations and find ways to live peacefully. Through a combination of research, education and practical peace support, we enable and support learning processes that inspire the development of new perspectives, relationships and behaviour, thus opening possibilities for conflict transformation.

PUBLISHED BY

Berghof Foundation Operations gGmbH
© Berghof Foundation Operations gGmbH
Lindenstraße 34
10969 Berlin
Germany
www.berghof-foundation.org

December 2022
All rights reserved.

Coverdesign: AMBERPRESS, Katja Koeberlin, Gosia Warrink
Translation: Strategic Agenda
Assistant Translator and Proof-reader: Abdulahi Rabi



Buug-yaraha Wadahadalka Qaranka

Hagaha Xirfadlayaasha

Nuxurka oo Kooban

Micnaha guud

Tobankii sano ee u dambeysay, Wadahalka Qaran ayaa loo arkaayay in ay yihiin aalad muhiim u ah ka hortagga kororka rabshadaha iyo maareynta qalalaasaha siyaasadda iyo kala-guurka. In kasta oo laga yaabo in si ballaaran uga hadlaan dowladaha qaran, dhinacyada mucaaradka, kooxaha bulshada rayyidka iyo dhaqdhaqaqyada hubeysan, iyo sidoo kale siyaasadda caalamiga ah, hawl-wadeennada, kooxaha diblumaasiyiinta iyo deeq-bixiyeyaasha, caanimadooda illaa iyo maanta ma aysan barbar dhigun fikradda cad. Waxaa aad u yar khayraadka la-hayo ee hagitaan wanaagsan oo dhammaystiran iyo taageero dhab ah lagu-siin lahaa kuwa sahaminaya Wadahadal Qaran oo xal suurigel ah u noqon kara ka-gudbidda ismari-waaga siyaasadeed, xaaladaha isku-dhaca kala-qaybsanaanta keenaya, dhacdooyinka isku-dhaca kala-qaybsanaanta keenaya ama xilliyada kala-guurka ee qalalaasaha leh.

Buug-yarahaan oo salka ku haaya daraasado taxane ah oo casri ah, waxay ujeedadiisu tahay in uu gacan ka geysto Wadahadal Qaran, isaga oo isu keenayo aragtiyo iyo khibrado ka kala yimid gobollo kala duwan. Ujeeddada Buug-yaraha waa labo: (1) in la bixiyo qaab-dhismeed falanqeysan ee Wadahadallada Qaranka iyo (2) u adeego sidi qalab wax ku ool ah oo loogu tala galay kuwa ku howlan hirgelinta hanaankaan. Waxa kale oo ay ka hadleysaa doorka hawl-wadeennada dibedda iyo sida ugu habboon ay u taageeri karaan habka Wadatashiyada Qaran, laakiin waxay guudahaan diiradda saaraysaa kuwa hoggaanka haaya marka ay timaaddo go'aannada ku aaddan qaabeynta, maareynta iyo hirgelinta habka Wadatashiyada Qaranka.

Fikradda

Wadatashiyada Qaranka waa hab siyaasadeed oo qaranka leeyahay oo ujeeddadiisu tahay in la abuuro heshiis dhexmaro xisbiyo badan oo daneeyayaal qaran ee xiliyada qalalaasaha siyaasadeed ee qotada dheer, xaaladaha dagaalka ka dib ama inta lagu jiro kala-guurka siyaasadeed ee fog. Marka loo eego micnaha guud, Wadahadallada Qaran waxaa loo adeegsan karaa farsamooyin loogu talagalay (a) **ka hortagga iyo maareynta qalalaasaha**, dadaal muddo gaaban ah, oo loo fulliyay si xeeladeysan si loo xalliyu ama looga hortago bilawga rabshadaha hubeysan, xallinta ismariwa siyaasadeed iyo dib-u-dhisidda heshiiska siyaasadeed ee ugu-yar (tusaale ahaan, Tunisia); ama (b) **isbeddel aas-aasi ah, oo leh sii kordhid muddo dheer ah**, oo loo maleeyay in uu yahay hab lagu qeexaayo xiriirkha bulshada iyo dowladda, ama la sameeyo 'heshiis bulsho' iyada oo loo maraayo isbeddellada hay'adaha iyo dastuurka (tusaale ahaan, Yemen).

Wadahadallada Qaran keliya waa hal waddo lagu-xallinaayo qalalaasayaasha siyaasadeed iyo isku-dhacyada rabshadda wata laguna hagaayo hababka isbeddelka, oo ay barbar socdaan farsamooyin kale ee isbeddelka isku dhaca, sida dhedhexaadinta iyo heshiiska. Astaamaha kala xadaynta Wadatashiyada Qaranka waa habraaciisa (halkii loogu talagalay natijada) ujeeddada, heerka iyo baaxadda ka qeybgalka (isku xirka noocyada kala duwan ee bulshada), iyo abaabulkeeda iyo fududeynta qaran (hawl-wadeennada dibedda ee diiradda saaraya hawlahaa taageerada keliya). Ficil ahaan, si kastaba ha ahaatee, xal kasta oo waara waxay u badan tahay in uu u baahdo isku darka hababka micnaha guud ku saleysan. Geedi-socodka Wadahadallada Qaranka wuxuu ficil ahaan mari karaa waji diyaargarow dhedhexaadin ah isla markaana dib ugu laabanaya heshiis culus xiliyada siyaasadda muhiimka ah. Waxaa intaa dheer, wuxuu dhici karaa ka hor, ka dib ama barbar socda geeddisocodka laga heshiiyay ama la dhedhexaadiyay.





Laga soo bilaabo fikradda illaa iyo ku-dhaqmidda: fursadaha kala-duwan ee naqshadaynta geeddi-socodka iyo tixgelinta dhabta ah.

Wadahadal kasta oo Qaran wuxuu dhisayaa qaab-dhismeed u gaar ah oo u dhigma baahiyaha gaarka ah ee micnaha guud iyo ujeeddada geeddi socod kasta. Si kastaba ha ahaatee, waxyaabo ay isku midka yihiin ayaa laga fahmi karaa iyada oo ay qaab-dhismeedyada Wadahadal ka Qaran inta badan ka jawaabaan howlo aas-aasi ah oo muhiim ah (→ *Qaab-dhismeedka Wadatashiyada Qaranka, p. 5*). Iyada oo, Buug-

yaraха wuxuu kala saaraа wajiyada kala duwan (diyaarinta, habka iyo hirgelinta) wuxuuna si cad u qoondeynayaahay'adaha u dhigma. Si kastaba ha ahaatee, ficiл ahaan, kala-guurka hal waji illaa iyo midka kale inta badan waa mid fudud, oo aan xariiq toosan ahayn oo badanaa hakad soogalo dibna u bilaabma.

WAJIGA DIYAARGAROWGA

Wajiga wajiga diyaargarowga naftirkisa ayaa badanaa ka-kooban geeddi-socod waan-waanta. Waa wakhtigi laga wada xaajoin lahaa qaabeynta faa'iidata u leh geedi socodka, iyo sidoo kalexiriirkha udhexeeyaa axsaabta ugu dambeingo'aamin doona suurtagalmada wax-ka-qabashada khilfaaka iyada oo loo-sii-marayo hab nabadeed, siyaasadeed iyo wadahadal ku saleysan. In kasta oo ay bateen gorgortanka siyaasadeed, axsaabta dhinacyada farsameed ee wajigan la-xidhiidha ayaa ah kuwa muhiim ah saamayn ku leh geeddi-socodka dambe. Ka hor inta aan la bilaabin Wadatashiga Qaranka, habka diyaargarowga ayaa u baahan doona in la dejijo oo la isku

afgarto, iyada oo inta badan la adeegsanaayo kaabayaasha hay'adaha oo dhameystiran. Hawlaha muhiimka ah inta lagu jiro wajigaan waxaa ka mid ah (1) dejinta waajibaadka, oo ay ku jirto caddeynata ujeeddooyinka, himilooyinka iyo baaxadda geeddi-socodka; (2) diyaarinta geeddi-socodka iyo dadka; iyo (3) dhisidda kalsoonida. Doorashada diyaarinta naqshadda waxaa inta ugu-badan lagu-go'aamiyaa waxa geeddi-socodka laga-damacsanyahay, khayraadka jira, iyo danaha bahawadaagta ugu-waaweyn. Fikrad ahaan, waa in heshiis shaqeynaayo uu ka soo baxo ujeeddada muhiimka ah ee Wadatashiga Qaranka iyo mabaadi'da muhiimka ah.

Tixgelinta muhiimka ah

- **Inaad caddeysyo** waxa Wadatashiyada Qaran ay si dhab ah u gaari karaan, iyo sidoo kale si cad loogu dari karo geeddi socodyada kala-guurka ee weyn.
- **Lahaanshaha:** ka qeybgalka dhabta ah ee bahwadaagta ugu muhiimsan, la tashiyo ballaaran, iyo farsamada diyaargarowga ee loodhan yahay ayaa kobciya sharcinimada iyo lahaanshaha. Hawl-wadeennada qaranka waa in ay hoggaanka u qabtaan waxa quseeya naqshadeynta iyo hirgelinta geeddi-socodka Wadatashiga Qaran.
- **Kamid ahaanshaha:** wajiga diyaarinta waa in uu tixgeliyo danta bahwadaagta kala duwan, iyada oo la raacaayo hab loo dhan yahay. Waxaa jirta khatar ah in dhinacyada guud ee (dowladda) ay awood u adeegsadaan hay'adaha diyaarinta ka dib na "ay la wareegaan" geeddi socodka oo dhan.
- **Caddeynata waajibaadka iyo ujeeddada:** waa muhiim in la caddeeyo waxa geeddi socodka laga rabo in uu gaaro (iyo waxayna ahayn). Tani waxay ku wargelinaysaa geeddi socod ku filan naqshadeynta waxayna taageertaa maareynta waxa la-filaayo.

■ **Hoggaanka:** doorashada hoggaan sax ah ee wajiga diyaarinta waxay noqon kartaa calaamad muhiim ah oo waxay muujinaysaa daacadnimada geeddi-socodka ee qorsheynta waxayna ka caawin kartaa soo saarista sharchiyeysnaanta.

■ **In si tartiib ah loo socdo si loo dhaqsado:** wajiga diyaaruntu wuu ka-badanyahay hordhac geeddi-socodka habboon waa in qorshayntiisa iyo hirgelintiisa la-siiyo daryeel iyo tixgeliin mug la-mid ah leh waana in loo qorsheeyo loona hirgeliyo si la mid ah habka daryeelka iyo tixgeliinta.

■ **Hay'adaha iyo farsamooyinka:** shaqada, waajibaadka, kursiga iyo farsamooyinka go'aan qaadashada waa in si cad loo qeexaa. Hay'adha diyaarinta waxay si wanaagsan u adeegeysaa marka loo xilsaaro in ay soo saarto shuruudaha ka qeybgalka, fursadaha kala-duwan ee dejinta ajeendaha, iyo fursadaha kala-duwan lagu dhameyn karo ismari-waaga inta hawsha lagu jiro.

■ **Muhiimadda tallaabooyinka kalsoonni dhisidda:** inta badan waxaa lagu gartaa heshiisyad adag, wajigaan waxay sidoo kale bixisaa fursado gaar ah oo loogu tala galay xiriirkha - iyo kalsoonni dhisidda haddii ay taageeraan tallaabooyinka kalsoonni dhisika.



≡ **Illaha:** Wadatashiyada Qaranka waxay u baahan yihii loo dhaqaale iyo kuwa bani'aadam oo la taaban karo. Waxaa muhiim ah in la helo taageerada waddamada waaweyn ee deeq-bixiyeyaasha ah iyo hay'adaha maaliyadda ee caalamiga. Waxaa si la mid ah muhiim ah in la meel dhigo qaab-dhismeedyada bixinta maalgelinta wax ku oolkaa

ah (sida lacagaha maalgashadaayaasha loo dhiga). Marka hawl-wadeen hubeysan oo aan dawli ahayn uu ku lug leeyahay geeddi-socodka, qoondeynta dhaqaale ee kooxda (maamulka, saadka iwm.) waxay noqon karaan arrin siyaasadeed iyo sharci ah waana in lagu la tacaalo dareen siyaasadeed iyo daryeel.

WAJIGA GEEDDI SOCODKA

Wajiga geeddi socodka waa wajiga ugu furan ee Wadahadalka Qaranka. Tallaabooyinka muhiimka ah, hab-raacyada iyo farsamooyinka la xiriira wajigaan waxaa ka mid ah:

Dejinta mawduucyada: habka dejinta ajendaha – haddii loo maareeyo si hufan oo loo dhan yahay – waxay bixin kartaa caddeyn dheeraad ah oo ku saabsan nooca Wadahadalka Qaran, axsaabta na ku qasbi karta in ay wax ka qabtaan geeddi socodka isla markaana u adeegto sida tababarasho lagu dhisaayo kalsoonida iyo abuurista faham la wadaago ee jagooyinka iyo aragtida.

Helitaanka qaban-qaabiye kulan oo aamin ah oo lagu kalsoonyahay: doorashada qaban-qaabiyaha shirka ayaa inta badan ah calaamad awood leh oo ah waxa laga filan karo geeddi socodka guud. Doorashada isku-duwe aamin ah oo si ballaaran loo aqbali karo dhaxalgal ah islamarkaana dhexdhexaadiyeyaasha gudaha ayaa inta badan si gaar ah loogu meeleyaa in ay ciyaraan doorkaan muhiimka ah.

Go'aaminta cabbirka: ma jiro cabbir ku habboon; balse tan waxay ku xiran tahay ujeeddada geeddi socodka u doonaayo in uu fulliyo (ka hortagga/maareynta qalalaasaha oo loo barbardhigaayo isbeddelka aas-aasiga). Go'aaminta cabbirka geeddi socodka waa in ay noqota natijada lagu cabbiraayo fursadaha iyo ka shaqeynta xaaladaha adag. Hase ahaatee, halkii laga yeeli lahaa dalabka maamulka ee ka dhanka ah naqshadeynta geeddi socod loo dhan yahay, kan dambe waa in loo tixgeliya si hal abuur leh iyada oo la tixgelinaayo waddooyinka kala duwan ee ka qeybqaadashada (toos ah, aan toos ahayn, iwm.)

Xulashada ka qeybgalayaasha: xulashada ka qeybgalayaasha inta badan waa hab cad oo tallaabooyin badan leh waana in loo qaabeeya si ka tarjumeysa qaab-dhismeedka bulsho ee bulshada la xiriira arinta (arrimaha) la doonaayo in wax laga qabto. Xulashada ka qeybgalayaasha waa shey muhiim ah oo lagu hubinaayo in Wadatashiyada Qaranka ay noqdaan kuwa sal ballaaran oo loo wada dhan yahay, iyada oo axsaabta lagu soo daray hab ka tarjumeysa mawqifkooda bulshada dhexdeeda (marka Bulsho dhexdeeda

(sida ka soo horjeedo dhammaan dhinacyada haysto tiro isku mid oo kuraasta ah. Shuruudaha iyo farsamooyinka xulashada waa in ay ahaadaan kuwo isku xiran, cadaalad ah oo daahfur (oo ah, si cad loo sheegay) si loo arko in ay sharci yihii.

Dejinta mabaadi'da hagitaanka iyo xeerarka aas-aasiga ah: habraaca cadaaladda waa arrin muhiim u ah soo saaridda sharciga islamarkaana caddeyn waa in ay ka jirtaa xeerarka habraaca, taageeridda awoodda lagu kormeeraayo geeddi socodka iyo in si wax ku ool ah looga qeybalo.

Dejinta hababka go'aan gaarista iyo dhisidda is-afgaradka: go'aan gaarista Wadatashiyada Qaranka waxay inta badan ku saleysnaadaan is-afgarad, kaas oo inta badan ah geeddi socod lagu-caajiso oo halis ah. Geeddi-socoyada intooda badan waxay dejiyaan hab tallaabooyin badan waxayna leeyihiin farsamooyin samaysan oo looga gudbi karo. Haddii si wanagsan loogu dhaqmo, waxay kobcisa sharchiyeysnaan iyo daacadnimo qoto dheer oo ay hawl-wadeenno kala-duwan u qabaan geeddi-socodka iyo natijjooyinkiisa.

Ka qeybgalinta dadweynaha: hubinta in geeddi socodka ay bulsha-weyntu fulin doonto taasina ay u baahan doonto in dadweyna la-gaadhisiyo uuna wada-xaajood ka-yeesho. Awood u yeelashada in la raaco geeddi-socodka iyo in la bixiyo talabixin heerar kala duwan waxay kordhisaa taageerada iyo rabitaanka dadweynaha. Muhiimad ahaan, waxaa khasab ah in hababka loo-farsameeyo oo gashiga dib ugu soo shubaya geeddi-socodka.

Abuuritaanka qaab-dhismeedyada taageerada, farsamooyinka lagu joojinaayo ismariwaaga iyo taxaddarka: qaab-dhismeedyadaan waxaa si gaar ah loogu talagalay ka caawinta sidi looga gudbi lahaa caqabadaha iyo ismariwaaga iyo si bu'da gorgortanka iyo geeddi-socodka wadahadalka waddada ay saaran-yihiin loogu sii hayo. Waxaa muhiim ah in laga faa'iideysto hab dhaqamada caadada qaranka iyo illaha loo adeegsaday in laisku afgarto oo looga hortago ismariwaaga.



WAJIGA FULLINTA

Natiijooyin kala duwan ayaa laga yaabaa in ay ka soo baxaan wajiga geeddi socodka Wadatashiga Qaranka. Kuwaasi waxaa ka mid ah **kuwo aan la taaban karin** (dhisidda xiriirk, waxbarashada madaniga, iwm.) iyo **kuwo la taaban karo** (isbeddel siyaasadeed iyo dastuur, iwm.) natiijooyin isku mid ah. Hirgelinta saxda ah ee natiijooyinka la taaban karo ayaa muhiim u ah sida geeddi socodka iyaga lagu gaaraayo. Waxaa laga yaabaa kaliya in markaan tayada iyo ka-go'naanshaha waxa lagu heshiiyay ay noqdaan kuwa muuqda. Iyada oo natiijooyinka isla-markaaba ka soo baxaya Wadahadalka Qaranka ay u muuqdaan in ay la mid yihiin heshiisyada lagu gaaro wada-xaajoodyada xabbad joojinta ama geeddi-socodyada dhedhexaadinta, geeddi socodka lagu gaaraayo heshiiska ayaa sida-qaalibka ah ka duwan. Wadahadalka Qaranka waa hannaan abaabulan oo la fududeeyay kuna saleysan mabaadi'da ah sida saxda ah sii soconaya

oo si ay u dhaqangalaan xafadda xidhitaanka ka-dib. Waxaa intaasi dheer ka-qaybqaadashada geeddi-socod kujiheysan oo noqon kara khibrad xoogan. In kox dad oo ka badan tirada caadiga ah lagu soo daro geeddi socodyada xabbad joojinta ama dhedhexaadinta waxay sidoo kale u baahan doontaa in la tixgeliyo inta lagu jiro wajigaan: dadka ayaa u baahanayo in ay arkaan tabarucaadkooda oo waxtar sii soconaya yeeshaa inta lagu jiro wajiga hirgelinta. Wajiga hirgelinta ayaa waxaa lagu-fududayn karaa farsamooyin kala-duwan oo ay ku-jiraan (1) kaabayaasha hirgelinta; (2) farsamooyinka damaanad qaadka iyo la socodka; iyo (3) madasha Wadatashiga dabagalka ah. Si wadidda niyadda geeddi socodka iyo naqshadeynta wajiga hirgelinta oo hab loo wada dhan yahay looga qeybqaato ayaa sii kordhin karta taageerada hirgelin dhameystiran iyo xoojinta geeddi-socodyada isbeddelka.

Tixgelinta muhiimka ah

≡ **Waxaa muhiim ah in la maareeyo waxyaalah la-filaayo** iyo in aan mid xadhaaf ah laga-dhigin rajada laga qabo Wadatashiyada Qaranka. Wadatashiga Qaran waa in aan lagu qiimaynin natiijooyinka la taaban karo keliya balse in la eego geeddi socodka guud ahaan. Waxaa intaa dheer, in lagu guuleysto hirgelinta tallaabooyinka degdega ah ee natiijooyinka wakhtiga gaaban aysan horseedin in wax la iska fududeysto, balse ay waddada u furto hirgelin ballaaran oo awood u siinaaya isbeddel aas-aasi ah.

≡ Nidaamka lagu garaayo natijada ayaa muhiim u ah si la mid ah islamarkaana si toos ah u saameynaysa – tayada natijada. Marka laga hadlaayo Wadatashiyada Qaranka waxaa faa'iido leh **in ka qeybgalayaasha ay ku dadaalaan in ay gaaraan heshiis ay isku raacsan yihiin**, iyada oo si loo wada dhan yahay ay uga qeyb qaadanayaan hawlwadeennada ay khuseyso. Tan ayaa sidoo kale fududeyn karta in heshiiska u helo tageero ballaraan laga bilaabo bilowga iyada oo kordhineysa suurtagalmimada in si guul leh loo fulliyo. Arrin kale oo gacan ka geysan karta hirgelinta waa marka heshiisyada ay gaaraan heer ka sareeyo heerk ugu hooseeya ee la wadaago si dhab ah wax looga qabto cabashooyinka qotada dheer.

≡ Iyada oo ay jiraan dhammaan qorsheynta iyo diyaargarowga dhagalaya geeddi-socodka Wadahadalka Qaran, haddana marka wajiga dhaqangelinta lagu-dhexjiro, waxaa waxtar yeelanaysa in LA-HUBIYO IN UUSAN NOQON GEEDDI-SOCOD UU QORSHE WADO, balse uu yahay mid uu isbaddal wado. Waxaa muhiim ah in la-yeesho tirsi-taariikheed (jadwal) cad oo ayla-socdaan tallaabooyinka dhaqangelinta (oo ay la-socdaan waqtiga kama-dambaysta ah ee lagufulinayo oo si adag loo-dhigayo, balse waaqici ah). In kasta oo 'madmadowga wanaaga leh laga in uu mararka qaarkood waxtar yeesho, **hirgelinta farsamooyinka iyo hay'adaha ayaa ku tiirsan luuqad cad** ee talooyinka iyo heshiisyada. Intaa waxaa dheer, heshiisyada aan dhameystirneen waxay u baahan yihiin habab dabagal ah si loo hubiyo in ay ku lug lahaan waayaan ama loo lumiyo, taas oo caqabad ku ah hirgelinta heshiisyada kale.

≡ Fikrad ahaan, wajiga hirgelinta Wadatashiga Qaran ma'aha in uu noqdo mid ku saabsan 'joojin' balse **'furitaan' booska Wadatashiga joogtada ah ee heerar badan** (tusaale ahaan, heer qaran iyo mid aan rasmi ahayn oo u dhixeyya ka qeybgalayaasha Wadatashiga). Si loo helo qaab-dhismeed waara, fikradda qaab-dhismeedka Infra ee Nabadda (I4P) ayaa laga yaabaa in ay mudan tahay in la tixgeliyo.



Qaab-dhismeedka Wadatashiga Qaran

WAJIGA DIYARGAROWGA

Qorsheyaasha rasmiga iyo kuwa aan rasmiga ahayn ayaa ka qeybgali kara diyaargarowga bilowga, waxay u gudbi karaan baaritaanka jagooyinka siyaasadeed.

Guddiga Xiriirkha (Yemen)

KOOMIISHINKA DIYAARINTA

Guddiga guud ee diyaarinaaya geeddi socodka. Wuxuu qexaa ama go'aamiyaa

- Ujeeddada iyo mawduucyada
- Qaab-dhismeedka geeddi socodka
- Shuruudaha isku-keenidda qaybaha kala-duwan iyo habraacyada xulashada ka qeybgalayaasha
- Xulashada guddoomiyaha
- hab-raacyada go'aan qaadashada
- Qaab-dhismeedyada taageerada
- Saadka, maalgelinta iyo amniga

Guddiga Diyaarinta (CAR),
Guddiga Diyaarinta Qormada Qabyada ah (Afghanistan),
Guddiga Diyaarinta (Benin)
Guddiga Diyaarinta Sare (Sudan)
Kulanka Diyaarinta (Poland)

WAJIGA GEEDDI SOCODKA

GUDDIGA LA ISKU RAACAY

Guddi xallinaya arrimaha taagan iyo kuwa la isku haysto. Waxay u shaqeysa sidi farsamo lagu jebinaayo ismariwaa. Mararka qaar shaqadaan ayaa waxaa qabto guddiyada kale iyo/ ama qaab-dhismeedyada aan rasmiga ahayn.

Guddiga Dib-u-eegista (Baxrayn),
Guddiga la isku raacay (Yemen),
Guddiga Dib-u-heshiisinta (Afghanistan)

XOG-HAYNTA

Taageerada farsamo ee geeddi socodka, oo ay ku jiraan maamulka, dukumentiyada iyo maareynta maaliyadda. Waxaa loo xilsaari karaa wargelinta iyo la-talinta bulshada.

Xog-haynta (Afghanistan, Yemen)
Guddiga Farsamo ee Ururka, iyo Xog-haynta Farsamada (CAR),
Wakaaladda Madaxtooyada (Colombia),
Xog-haynta Nabadda (Nepal)

GUDDI

Hay'ad kormeer oo maareyo, guddoomiso iyo xirfirso geeddi socodka.*
Guddiga (Benin, Mali). Xafiska Hoggaanka (Afghanistan). Madaxtooyada (Bolivia, Colombia). Guddiga Isku xirka Sare (Sudan). Madaxtooyada (Yemen).

* Geeddi-socodo ay rasminimadoodu hoosayo, guddoomiyaha /fududeeyaha ayaa qaban kara hawsha noocaas, sida Koox afar qof ka kooban (Quartet) ay ka sameeyeen Tunisia

KULANKA KOOXDA OO DHAN

Madasha Wadatashiga dhexe, oo ay ku jiraan dhammaan ka qeygalayaasha tooska ah ee geeddi socodka. Waxay u shaqeysa sida hay'adda guud ee go'aaminta.

Golaha Guud (Afghanistan),
Guddiga Guud (Baxrayn),
Kulanka kooxda oo dhan (Ciraaq),
Golaha Guud (Mali)
Shirka Guud (Poland)

KOOXAHA SHAQADA

Kulammo yar-yar oo ka shaqeynaayo mowduucyado arrimo gaar ah.

Kooxaha Shaqada (Afghanistan),
Kooxaha Shaqada (Baxrayn)
Guiddiyada Shaqada (Benin, Bolivia),
Kooxaha Mowduucyada (CAR),
Koomishinada Shaqada (Guatemala),
Miisaska waa-weyn iyo kuwa hoose (Poland),
Guiddiyada (Sudan),
Guiddiyada Farsamada (Koonfur Afrika)

HIRGELINTA

Ka qeybgalka geeddi socodka waxay horseedi kartaa natiijooin kala duwan oo aan la taaban karin, sida isbeddelada dabecadaha iyo xirfirada, iyo sidoo kale wacyigelinta/aqoonta bulshada ee ku aaddan arrimaha muhiimka oo korodhay.

NATIIJOYINKA

- Isbeddel siyaasadeed
- Isbeddel dastuuri ah
- Xeerka xuququl insaanka
- Amniga kala guurka
- Dib-u-habeynta bulshada iyo dhaqaalaha
- "Wax ka qabashada wixi hore" iyo farsamada cadaaladda ku meel gaarka

Kaabayaasha Hirgelinta

Farsamooyinka Dammaanad qaadka iyo La socodka

Kulamada Wadatashiga ee Dabagalka



Ka qeybgalka dibedda

In Qaranku leeyahay oo u hoggaamiyo micneheedu ma'aha in geeddi socodka Wadahadalka Qaran aysan soo gaarin saameynta xubno, xaaladaha, iyo hawl-wadeennada dibedda. Hawl-wadeennada dibedda/caalamiga ayaa doorar kala duwan ka ciyaraa geeddi socodka Wadatashiga Qaran. Sida **suurtageliyaha**, waxay dhisaan taageerada Wadatashiga Qaran ee heer caalami, waxay saameyntooda u jiheeyaan dhinacyada is-haysta, waxayna dhinacyada ku jiheeyaan in ay wadahadal isla yeeshaan, iyaga oo dhinacyada ku dhiirigelinaaya in ay ka qeybqaataan (tusaale ahaan, Kooxda Siddeedaad ee Guatemala). Tan waxay ka koobnaan kartaa dhiirigelin isku dhaf ah (deyn cafinta, xirmooyinka caawimaadda) iyo cadaadiska (cunuqabateynta 'casriga ah', cunqabateyn dhaqaale). **Maalgeliye** ahaan, waxay bixiyaan ilo dhaqaale oo loogu talagalay sameynta geeddi socodka Wadatashiga Qaran oo si toos ah (Yemen) ama aan si toos ahayn loo maraayo hab maxallii ah oo taageeraya geeddi socodka siyaasadeed (Nepal). **Goobjooge** ahaan, waxay goobjoog ka ahaadaan inta lagu jiro geeddi socodka, iyaga oo aan wax door ah ka qaadanaynin, una dhaqmaaya sida markhaatiyaal, xaqijinaaya taageerada caalamiga ee geeddi socodka, abuuraya jawi ku habboon isu soo dhowaansho iyo wadaxaajoodyo ku saleysan aamiinaad u dhexeysa labada dhinac. **Damiin** ahaan, waxay u dhaqmaan sidi mas'uul, iyaga oo ka-go'naanshahooda islamarkaana taageeradooda siyaasadeed ku caawinaya geeddi socodka Wadatashiga Qaran iyo hirgelinta natijjooyinka. Xaaladaha ay dhinacyadu qabaan aamiinaad yar, ka qeybgalka hawl-wadeennada dibedda sida goobjoogeyaa iyo damiin ahaan ayaa gacan ka geysan karta dhisidda kalsoonida iyada oo yarenaysa khatarta la og yahay ee ka imaan karta ka qeybgalka geeddi socodka ee dhinacyada. Maadaama ay doorarkaan u baahan yihiin awood, waxaa inta badan fulliya

dowladaha saameynta leh ama ururrada caalamiga ah iyo kuwa gobolka (tusaale ahaan, Hay'adda Qaramada Midoobay ee Guatemala; Qatar iyo Jamaacada Carabta ee Lubnaan)

Bixiyeyasha taageerada farsamo iyo mid khibradeed ahaan, waxay bixiyaan fikrado mawduuc ee ku saabsan meelo gaar ah (naqshadeynta geeddi socodka, awood qeybsiga, iwm.), tababaridda xirfadaha iyo khibradda isbarbardhigga, fududeynta shirarka Wadatashiga ee u dhexeeya ka qeybgalayaasha kala duwan ee Wadatashiga Qaran ama u dhexeeya khubarrada iyo ka qeybgalayaasha dibedda (tusaale ahaan, UNDP ee Jordan; Swiss ee Nepal).

Fududeeye ahaan oo gees ka taagan, waxay u dhaqmaan sida dilaal waxayna gacan ka geystaan dhisidda aaminaadda ama xallinta arrimaha gaarka ah ee geeddi socodka, iyaga oo inta badan si aan rasmi ahayn isugu keenaya ka qeybgalayaasha, una oggolaanaaya in ay baaraan ikhtiyaarrada oo xaalad rasmi ah aan suurtogali lahayn (tusaale ahaan, Qaramada Midoobay ee Libya; Midowga Afrika ee Sudan). Tan ugu-dambaysa balse aan ugu-liidan **fulliye, hirgeliye** ahaan, **kormeere** ahaan iyo **xaqijiye** ahaan, waxay mas'uul ka yihiin sidi loo dhaqan gelin lahaa ama loo kormeeri lahaa natijjooyinka ka soo baxay Wadatashiga Qaran. Hawshaan waxaa inta badan fulliya ururro heer gobol ama kuwa caalamiga (Bangiga Addunka ee Yemen; Guddiga Shaksxiyaadka Caanka ee Afrikaanka ee Kenya), laakiin waxaa inta badan dhameystira ururrada iyo shabakadaha bulshada rayyidka ah ee kormeerka, maadaama ay ku dhex jiraan arrimahaan oo ay gaari karaan meelaha aadka u fog fog.

Waxaa la ogaan karaa hawlaha gaarka, marka loo eego wajiga geeddi socodka Wadatashiga Qaran iyaga oo ku xiran nooca hawl-wadeenka dibedda, haddii ay noqon laheyd hawl-wadeen siyaasadeed iyo mid horumarineedba.

	Hawl-wadeennada siyaasadda	Hawl-wadeennada horumarka
Dyaarinta	<ul style="list-style-type: none"> ■ Deji dhiirigelin oo dhis taageero siyaasadeed ■ La xiriir bahawadaaga caalamiga iyo kuwa gobolka ee saameynta leh si loo abuuro jawi habboon ■ Taageer kalsoonida- iyo xiriir dhisidda 	<ul style="list-style-type: none"> ■ Bixi dhiirigelin adiga oo u sii maraya dhinaca bixinta maalgelin/xaddidid ■ Dhis awoodda kooxaha u oboleeya in mawduucyada horumarinta lagu-soo-daro geeddi socodka ■ Taageer aaminaadda – iyo dhisidda xiriirka ■ Taageer ol-olayaasha maclumaadka dadweynaha ee heerka aas-aasiga ah
Geeddi socod	<ul style="list-style-type: none"> ■ Bixi xirfad geeddi-socod iyo hannaan ku saleysan ■ Abuur jawi aaminaad leh adiga oo u dhaqmaaya sida kormeere ama damiin ■ Hubi taageerada caalamiga ■ Fududee shirar gaar ah 	<ul style="list-style-type: none"> ■ Maalgelinta kaabayaasha ■ Bixi taageero farsamo, tusaale ahaan, kooxaha shaqada ee wax ka qabta arrimaha horumarka ■ Bixi maclumaad bulsheed iyo kuwa dhaqaaleed, waxaanad fulisaa qiimaynada nuglaanshaha la-xidhiidha





- La soco dhaqangelinta natiijooyinka
- Joogtee firada caalamigaha ee taageeridda dhaqangelinta natiijooyinka
- Taageer sameynta hay'ado xasiloon oo ku saleysan natiijooyinka

- Bixi sad nabadeed oo lagu kala qaybsanaayo adiga oo bixinaaya taageero dhaqaale oo lagu fullinaayo natiijooyinka.
- Bixi taageero farsamo oo lagu hirgolinaayo natiijooyinka
- Samee qjimeynta baahiyaha ee colaadaha ka dib

Tixgelinada muhiimka ah

- In bahwadaagta qaran loo oggolaado in ay go'aamiyaan doorka hawl-wadeennada dibedda.
- 'Kabitaanka' shaqada bahwadaagta qaran iyada oo loo maraayo wadashaqeeyn iyo toosin dhow.
- In si aan eexasho laheyn loola macaamilo dhammaan hawl-wadeennada qaran ee muhiimka ah, tusaale ahaan marka lala macaamilaayo kooxaha la mammuuucay.
- In la ixtiraamo xaqiqooyinka maxalliga ah iyo dhaqanka, in kasta oo laga yaabo in kuwaan aysan la mid ahayn caadooyinka iyo qiyamka dowladaha iyo ururrada kala duwan. In aan geeddi socodka lagu wiiqin dano gaar ah, in aan la lumin kalsoonida ay qabaan bahwadaagta maxalliga ah.
- In lagu dabacsanaado maalgelinta, iyada oo maskaxda lagu haayo in marxaladaha kala guurka ay inta badan u baahan yihiin ka qeybqaadasho wakhti dheer islamarkaana ay suurtagal tahay in ay u socdaan si aan toos ahayn.

- In la sameeyo go'aammo dhaqaale iyada oo la la tashanaayo islamarkaana ay qeyb ka yihiin daneeyayaasha qaran, sidoo kale si loo hubiyo in aanay dadka deegaanka u arkin in Wadatashiyada Qaran ay yihiin kuwa si xad dhaaf ah ugu tiirsan deeq bixiyeaasha.
- Iisticmaalka farsamooyinka sida Kooxaha Saaxiibbada iyo kooxaha taageerada, si loo yareeyo dhibaatooyinka isu duwidda, oo caqabad joogta ku ah geeddi-socodyada nabadda oo ay daneeyayaal badan ka hawlgalaan.
- Isku toosinta mudnaanta istiraatijiyadeed iyo qiyasidda ka qeybgalka baahiyaha muwaadiniinta hoggaaminaaya Wadatashiyada Qaran; ku jicheyan hab ku saleysan baahi iyo dhinacyo badan leh (halki ay ka-noqon lahayd mid saad iyo qoraal ku saleysan).

Halbeegyada Wadatashiga Qaran ee lagu guuleystay

Shuruudaha: diyaar u ahaanshaha wadaxajoodka iyo la macaamilka dhinaca kale iyo in si daacad ah sidaas loo sameeyo; rabitaan siyaasadeed iyo in lagu dadaalo geeddi socodka; heerka ugu yar 'aaminaadda shageynaysa; qjimeynta dhabta ah ee kakanaanta Wadatashi Qaran iyo fursadaha guusha si looga fogaado filashooyinka aan xaqiqda ahayn, niyad jabka iyo 'daalka Wadatashiga; iyo in laga qeybgaliyo hawl-wadeennada bulshada rayyidka, haweenka, dhallinyarada iyo qeybaha la haybsooco, iyo sidoo kale awood hayayaasha ka socda qeybaha aan rasmiga ahayn iyo kuwa dhaqanka.

Hawl-wadeennada caalamiga/gobolka: is-afgaradka siyaasadeed ee ugu yar ee u dhexeeyaa hawl-wadeennada caalamiga iyo kuwa gobol ee khuseeya taageeridda isku dayga Wadatashiga Qaran; is-afgarad loo maraayo wadatashiyu ku meel gaar ah ama qaab hay'ad ah (kooxaha xiriirkha, kooxaha saaxiibada, Qaraarka Golaha Ammaanka ee Qaramada Midoobay oo si cad u tixraacaya Wadatashiga Qaran).

Farsamooyinka dheelitirka awoodda: oo lagu la tacaalaayo cadaalad darrada awoodda ee miiska Wadatashiga; tallaabooyin karti dhiska si kor loogu qaado awoodaha heshiiska bahawadaagta oo aan khibrad u lahayn Wadatashiga iyo gorgortanka.

Kooxaha aan isku fikirka ahayn: waa xeelad cad oo lagu la macaamilaayo hawl-wadeennada hubeysan oo ay adag tahay in la gaaro si aanay hadhow geeddi socodka ugu noqonin qaswadayaal, oo ay ku jiraan ciidamada iyo kooxaha la mammuuucay.

Qabanqaabiyyaha: xulashada xog ogaalnimo ee qof ay dhinacyada oo dhan u arkaan in uu yahay hawl-wadeen sharci oo aan dhinac u eexan.

Mowduucyada: arrimo leh muhiimad qaran oo gaara udub dhexaadka amuuraha wakhtigaas dhibka ku haaya waddankaas, laakiin sidoo kale wax ka qabashadooda ay tahay mid caqli gal ah.





Kobcinta awoodda: kobcinta xirfadaha farsamo ee dadka gudaha iyo dhedhexaadiyeasha iyada oo loo maraayo tababarka iyo kobcinta awoodda qaab Wadatashi Qaran, fududeynta iyo gorgortanka, oo sidoo kale kordhinaysa kalsoonida ay ku qabaan in ay arrimahooda qabsadaan iyaga oo aan ku tiirsaneen kaalmada dibedda.

Baaritaanka iyo diyaarinta: kobcinta fikradda Wadatashiga Qaran ee goobaha bulshada iyo siyaasadda si isku mid ah; diyaarinta hawl-wadeennada khilaafka; raadinta dadaalka iyo maalgelin caalami ama gobol; iyo dejinta xeelado isgaarsiineed.

Hirgelinta: waxaa loola jeedaa in la raaco natiijooyinka lagu heshiiyay, kuna qalabeysan awood lagu la xisaabtamo

dhinayada; taageerada beesha caalamka ee lagu hirgelinayo geeddi socodka dhaqaalaha lagama maarmaanka ah, khibradda iyo cunaqabateynta casriga ah haddii loo baahdo.

Dammaanad amni: boos si xor ah oo madaxbannaan loogu shaqeeyo iyada oo aan laga baqeynin cadaadis siyaasadeed; joojinta rabshadaha socda, aan la mamnuucin kooxaha mucaaradka, xaqijinta xorriyadda warbaahinta.

Tubta la-marayo ee kala-guurka: geeddi geeddi-socodka isbaddalka ee isbabar-socda ee dhaqaaleed, qaab-dhismeed, siyaasadeed iyo garsoorka; tallaaboooyinka gargaarka bani'aadamnimo ee muddada gaaban iyo barnaamijaya xasilinta dhaqaale sida iyaga oo loo-arkayo in ay sadka nabadda yihiin.

Dhibaatooyin, isweydaarsi iyo su'aalo furan.

Wadatashiga Qaran waa geeddi socod adag. Dabeeecad ahaan waa kuwa siyaasad ah, oo inta badan ku saleysan nidaam siyaasad oo dhab ah, danaha gaarka ah iyo/ama xisaabinta siyaasadeed ee xisbi. Tan ayaa sidoo kale khuseysa quwadaha gobolka iyo kuwa caalamiga ah, iyada oo la eegin haddii ay doortaan in ay taageeraan, aysan daneynin ama cadow ku noqdaan geeddi socodka Wadatashiga Qaran. Waxaa intaa dheer, kooxaha mucaaradka ee siyaasadda iyo bulshada rayyidka ee gobollada oo dhan ayaa ka caajisay Wadatashiga maadaama aysan natiijooyin la taaban karo ka soo bixin isku dayo badan oo la sameeyay. Tan ayaa horseedday shaki ku saabsan suurtagalnimada wadahadal dhab ah, iyo sidoo kale daacadnimada lagu fullinaaya, taasi oo keentay shaki iyo 'daalka Wadatashiga'. Wadatashiga Qaran – ama arrin kasta oo ku saabsan geeddi-socod gorgortan oo nooc-walba ah – ayaa inta badan ah 'oo siyaabo kale lagu socodsiinaaya khilaafka'. Waxaa laga yaabaa in aanay ahayn kuwa qaran ama wadahadal iyaga oo had iyo jeer ay yihin farsamooyin aan dhameystirneen oo ka hooseeya nooca saxda ah. Xitaa haddii 'geeddi socod sida buugga wax-lagu-barto u daabacan la naqshadeeyay, xaalado ka baxsan awoodda kuwa samaynaya ama taageeraaya geeddi socodka ayaa horseedi kara burburkiisa, tusaale ahaan, marka ay quwadaha goboleed ay faragelin sameeyaan, quwadaha adduunka ayaa taageeradooda hoos u dhigaya ama waddanka ayaa isku-badalaya fagaaraha dagaalka wakaalashada.

Bahwadaagt aiska-dhaca iyo sidoo kale xirfadlayaasha iyo deeq bixiyeyaasha waa in ay arrintaan ku baraarugaan

marxalad walba si ay u sameeyaan qiimeyn daacad ah oo ku aaddan waxa si dhab ah suuragal u ah ee khuseeya isla xaaladdas. Nidaamyadaan waxay inta badan u janjeeraan inta u dhexeysa *daruuri* (waxa u baahan in ay dhacaan xaalad gaar ah), *rabitaan* (waxa fikir ahaan macquul ah), iyo *fursado wakhti gaaban furan oo ah in laga faa'iideysto* (waxa *suuragal ah*) oo isa soo bandhigaaya. Inta waxaa dheer, baahida Wadatashi Qaran oo inta badan ka dhiganta in xiriirkha dowladda-bulshada uu burburay islamarkaana shaqeyn waayay, taasi oo iyaduna si gaar ah u adkeynaysa in la horumaro lana joogteeyo geeddi socod wadatashi oo waxtar leh. Dhisidda kalsoonida iyo aaminadda gudaha xukuumadda, wakiiladeeda iyo hay'adaha waa geeddi socod muddo dheer oo oo sii socon kara Wadahadalka Qaran naftirkiisa ka-dib.

In kasta oo uu Buug-yarahaan soo jeedinaayo tallaaboooyin iyo ikhtiyaarro qaabeynta iyo sameynta hababka Wadatashiga Qaran, waxaan si weyn ula soconnaa dhaqdhaqaqyadaan iyo dabeeecadaha siyaasadeed ee hawsha iyo caqabadaha badan oo ay tan keenayso. Arrimaha ku saabsan go'aan qaadashada, cadaalad darrada awoodda, adeegsiga teknolojiyadda ee qalabkaan, wax isdaba marinta iyo siyaasadeynta ayaa ka mid ah caqabadaha uusan Buug-yarahaan ka jawaabin. Waxaan fahansannahay in Buug-yarahaan uu yahay shaqo socota, oo dhiirigelinaaya dood dheeraad ah islamarkaana ka qeyb ka qaadanaaya xirfadleynta maaddadaan aadka u yar.





Ku saabsan Buug-yaraha Wadatashiga Qaran.

Buug-yaraha waxaa lagu soo saaray qaab-dhismeedka mashruuca labo sanno ah (Maars 2015-ki – Abril 2017-ki), oo ay hirgelisay Ururka Berghof oo kaashaneyso Waaxda Arrimaha Dibedda ee Federaalka Switzerland. Mashruuca waxaa maalgaliyey Xafiiska Federaalka ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda ee Jarmalka oo kaashanaaya Waaxda Arrimaha Dibedda ee Federaalka Switzerland. Waxaa la soo saaray iyada oo lagu saleynaayo hab cilmi baaris ka qeybgal oo asal ah, iyada oo ugu horreyn laga soo qaataw waayo aragnimada daneeyayaasha iyo khubarrada waayo aragnimo soke u leh Wadatashiyada Qaran. Ururka Berghof, oo kaashaneyso Swisspeace, ayaa xoojiyey waayo aragnimadeeda ballaaran oo ay ku taageerayso Wadatashiyada Qaran iyo habraacyada kale ee kala-guurka iyada oo loo marayo geeddi-socodyo kala duwan. Kuwaan waxaa ka mid ah daraasadda cilmi baarista faahfaahsan ee Guatemala, Lebanon, Libya, Mali, Nepal, Sudan iyo Tunisia, kuwaasi oo ay diyaariyeen kooxo yaryar oo u

badan khubarro maxalli ah iyo dadka gudaha oo si toos ah ugu hawlanaa geeddi socodyadaan. Daraasadda cilmi baarista ee faahfaahsan waxaa lagu kabay daraasado mawduucyo leh, ku dhaqan khariidad dhameystiran ee Wadatashiyada Qaran iyo geeddi-socodyo la mid ah oo ka dhacay gobollo kala duwan, ka qeybqaadashada firfircoon ee la-talinta khubbarrada ee ku aaddan Wadatashiyada Qaran iyo isweydaarsiga Kooxda La-talinta mashruuca. Khubbarrada caalamiga ah, kooxaha farsamada iyo la-taliyayaasha gaarka ah ee Qaramada Midoobay ayaa sidoo kale la qabanqaabiyay iyaga oo qeyb ka ah Kooxda La-talinta si ay si qootodheer ah dib-u-eegis ugu sameeyaan nuxurka Buug-yaraha, iyaga oo xaqiijinaayo in uu ka hadlo su'aalaha la taaban karo ee xaaladda taagan.

Dhammaan daabacaadaha laga soo saaray macnaha mashruucaan waxaa laga heli karaa: www.berghof-foundation.org/publications/national-dialogue-handbook.

All publications developed in the context of this project can be accessed at:
www.berghof-foundation.org/publications/national-dialogue-handbook

